Länsstyrelserna

# Yarey faafitaanka cudurka ee waddooyinka dhaadheer ee gaadiidka dadweynaha ee basaska ama tareennada

**Meelahaas waxaa sida uu qabyo xeerka ku meel gaarka ah ee covid-19 waajib ku ah in ay ka**

## Adigaaga maareeya ama abaabula gaadiid dadweyne oo leh bas ama tareen aada meel ka dheer 150 kiiloomitir waa in:

- Aad qaadda tallaabo habboon si aad u yareysid faafitaanka cudurka.
- Aad howsha u waddaa si ciriiri looga fogaanayo oo uu dadku isu jir-jirsan karyo masaafo aamin ah marka laga eego dhanka ka hortagga cudurrada la is qaadsiiyo.
- Aad safarradaas yareysaa tirada rakaabka ah ee gaadiidka raacaya, si aysan marnaba uga badan kala bar oo bar tirada kuraasta ee meel kasta oo gaadiidka ka mid ah.

Go'aamadu ma khuseeyaan safarradi la bokintay inti aysan xannibaaduhu dhaqan gelin 14 Faberaayo 2021. Xannibaaduhu waxay shaqeynayaan ilaa iyo

Hindise ku aaddan macluumaad aad siin kartid macaamiisha oo ku saabsan talooyinka guud ee looga hortegi karo faafitaanka cudurka waxaad ka heleysaa folkhalsomyndigheten.se

Informationsblad om långväga kollektivtrafik på somaliska. Publicerat 2021-03-25.

Waxaa macluumaadkan la faafiyay 2021-03-25. Adiga ayaa mas'uul ka ah in aad si joogto ah ula socotid xeerarka markaas taagaan. Tani waa warbixin la soo gaabiyay oo ku aaddan waxa uu xeerka covid-19 ee ku meel gaarka ahi kaaga dhignaan karyo adigaaga maamula ama abaabula safarro dadweyne oo dhaadheer oo la raacayo bas ama tareen aadaya meel ka dheer 150 kiiloomitir. Fiiro gaar ah u lahaw in sharciyadi, xeerarki iyo qaraarradi horay loo gaaray iyo talooyinki guud ee lagu yareynayay faafitaanka cudurku ay sii shaqeynayaan.

Si aad u aragtid sharciga oo dhammeystiran iyo qoraalka qaraarka waxaa laguu tilmaamayaa riksdagen.se. Si aad u aragtid xeerka oo dhammeystiran, talooyin guud iyo macluumaad guud waxaa laguu tilmaamayaa folkhalsomyndigheten.se. Macluumaadka xukuumadda ee ku aaddan covid-19 waxaad ka heleysaa 1177.se. Macluumaadka xiriirka ee Guddiga gobalka iyo macluumaad markaas taagan oo ku aaddan ka warhaynta xagga shuruucda covid-19 waxaad ka heleysaa lansstyrelsen.se.